



Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiilada JSL



Warbixinta

Wax-qabadkii Golaha Wakiilada Sanadkii 2012-ka

Contact:-

Somaliland House of Representatives Building
Mobile:- +252-634425218 and +252-634424837

golaha@somalilandparliament.net

Visit the House Website www.Somalilandparliament.net or www.Somalilandparliament.com

Warbixinta Sanadkii 2012-kii ee

Wax qabadka Golaha Wakiilada

Waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa waxqabadka Golaha Wakiilada ee Sanadkii 2012ka oo shaxaysan, si aad u xusuusataan ugana qiyaas-qaadataan qorsheynta hawlaha Golaha ee sanadka 2013ka.

1. Kal-fadhiyadii Sanadkii 2012ka:-

1.	Kal-fadhigii 17 ^{aad}	21/01/2012-03/04/2012
2.	Kal-fadhigii 18 ^{aad}	09/06/2012-16/07/2012
4.	Kal-fadhigii 12 ^{aad} ee aan caadi ahayn	7/08/2012
3	Kal-fadhiga 19 ^{aad}	25/08/2012 -23/10/2012

2. Fadhiyadii Goleweynaha iyo Gudiyada:-

1.	Fadhiyadii Goleweynaha	84 fadhi
2.	Fadhiyadii Guddida Joogtada ah	31fadhi
3.	Fadhiyadii Gudiyada Golaha	43 fadhi
	Isugeyn	158 fadhi

3. Ansixintii Miisaanayda Qaranka:-

No	Miisaaniyada	W/ la-ansixiyay
1.	Miisaaniyada Qaranka sanadka 2012 iyo lifaaqyada ku lamaan	03/04/2012
2.	Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2013 iyo Lifaaqyada ku lamaan, Miisaaniyadan oo ahayd tii ugu horeysay ee Wakhtigeedii Dastuuriga ahayd lagu keeno Golaha, laguna Ansixiyo.	30/12/2012

4. Ansixintii Mashaariicda Sharci:-

No	Xeerka	Taariikhdi	Halka Loo gudbiyay
1.	Wax iyo Kaabista Xeerka Doorashiyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deeganka lifaaq saddexaad Xeer Lr.20/2001	05/02/2012	Madaxweynaha
2.	Wax ka badalka iyo Kaabista	05/02/2012	Madaxweynaha

	Xeerka ka qaybgalida Shirarka caalamku qabanayo Somalia		
3.	Xeerka Baanka Dhexe	24/03/2012	Madaxweynaha
4.	Xeerka Baananka Islaamiga ah	02/09/2012	Madaxweynaha
5.	Xeerka Wadamarista Gaadiidka	17/09/2012	Madaxweynaha
6.	Xeerka Baadhista iyoFayadhowrka Hilibka	30/12/2012	Madaxweynaha
7.	Xeerka Asaaska Komishanka Maamul Wanaaga	14/10/2012	Madaxweynaha
8.	Xeerka Hay'ada Sirdoonka Qaranka	14/10/2012	Madaxweynaha
9.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Gudidda Xirfadlayaasha Caafimaadka	23/10/2012	Madaxweynaha
10.	Xeerka La-dagaalanka Budhcad Badeeda	15/03/2012	Madaxweynaha
11.	Xeerka Wareejinta Maxaabiista	15/03/2012	Madaxweynaha

5. Xeerarkii Dhaqangalka Noqdey:-

No	Magaca Xeerka
1.	Xeerka Baanka Dhexe
2.	Xeerka La-dagaalanka Budhcad Badeeda
3.	Xeerka Wareejinta Maxaabiista
4.	Xeerka Baananka Islaamiga ah
5.	Xeerka Hay'dda Sirdoonka Qaranka
6.	Xeerka Guddida Mihnadlayaasha Caafimaadka
7.	Xeerka Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka
8.	Xeerka Komishanka Maamul Wanaaga

6. Xeerarkii Golaha Guurtida ku maqanaa:-

- Xeerka Wadamarista Gaadiidka Xeer Lr. 56/2012

7. Xeerarkii Golaha Horyaal ee Qabyada ah:-

No.	Magaca Xeerka
1.	Xeerka Booliiska
2.	Wax ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada

3.	Xeerka Statikiska (statistics law)
4.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka
5.	Xeerka Komishanka Dib-uhabeeynta Shuruucda

8. Ansixintii Masuuliyiinta Qaran:-

<u>No</u>	<u>Magaca Masuulka</u>	<u>Xilka uu hayay</u>
1.	Md. C/casiis Maxamed Samaale	W. Wasaarada Maaliyada
2.	Md.Cabdi Yuusuf Ducaale (Boobe)	Wasiirka Wasaarada Warfaafinta
3.	Md. Cali Cabdi Hure	Wasiirka Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta
4.	Md. Cabdilaahi Abokor Cismaan	Wasiir ku-xigeenka Amniga ee W/A/Gudaha
5.	Md. Mawliid Maxamuud Ibraahim	Wasiir Ku-xigenka Wasarada Arrimaha Dibada JSL
6.	Md. Nuux sh. Muuse Ducaale	Gudoomiyada Hay'adda Shaqaalaha Dawlada JSL
7.	Md. Maxamed Cumar Cabdilaahi	Gudomiye ku-xigenka H/Shaqalaha Dawlada JSL
8.	Md. Abiib Diiriye Nuur	Wasiirka Wasaarada Warfaafinta
9.	Md. Cali Siciid Reygal	Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha iyo Dhaqanka
10.	Md. C/laahi Maxamed Cakuse	Wasiir ku-xigenka W/warfaafinta
11.	Md. Keyse Cabdi Yuusuf	Wasiiru-dawlaha Gobolada Barri

9. Doorashadii 2 Xubnood ee Shirgudoonka Golaha Wakiilada:-

Ka dib markii Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamud Siilaanyo** u magacaabey Gudoomiye ku-xigeenkii 1^{aad} ee Golaha Wakiilada **Md. C/casiis Maxmed Samaale** in uu noqdo Wasiirka Wasaarada Maaliyada, iscasilaadiina uu Golaha u soo gudbiyayna Goluhu ka aqbalay, waxaa banaanaatey Jagadii Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad} ee Golaha Wakiilada, isla markaana Gudoomiye Ku-xigeenkii 2^{aad} ee Golaha Wakiilada **Md. Baashe Maxamed Faarax** uu Golaha u soo gudbiyay iscasilaad si uu isugu sharaxo jagada Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad} ee banaanaatey, Goluhu cod kaga aqbaley Mudanaha iscasilaadii.



Waxaa waraaqo codsi musharaxnimo ah shirgudoonka u soo gudbiyay Mudanayaal tiro badan laakiin isutanaasuley ka dib waxaa isugu soo hadhay Jagada Gudoomiye ku xigeenka 1^{aad} labada mudane ee kala **ah Md. Baashe Maxamed Faarax** iyo **Md. Ibraahim Axemed Haybe**, halka Jagada Gudoomiye Ku-xigeenka 2^{aad} ay isugu soo hadheen labada Mudane ee **Md. Dr Cali Yuusuf** iyo **Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle**.

Wuxuu Golaha Wakiiladu Fadhiisii 22aad ee kal-fadhigii 17^{aad} oo ay ka soo xaadireen 67 Mudane, iyadoo Mudanayashu cod gacan taag ah u qaadaya Mudanaha buuxinaya Jagada Gudoomiye Ku-xigeenka ay doorteed in **Md. Baashe Maxamed Faarax** uu noqdo Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad}, halka **Md. Dr Cali Yuusuf** uu ku guuleystey Cod gacantaaga inuu noqdo Gudoomiye Ku-xigeenka 2^{aad} ee Golaha Wakiilada, halkaas oo xubnihii la tartameyayna ay si waji furan ugu hambalyeeyen Mudanayaasha kaga guuleysatay doorashada, sidaana lagu buuxiyay Jagooyinkii shirgudoonka.



10. Go'aanadii 2012kii Goluhu gaadhey Sanadkaas:-

Iyadoo oo Guud ahaan go'aamada uu Goluhu gaadhey ay gaadhayaan 41 go'aan Gole, ayaa si loo fahmo akhris ahaan iyo qaabka qoraalkaba waxaanu warbixinta si gooni-gooni ah ugu kala xusney go'aamada Goluhu uu gaadhey mudadii labada sano ahayd ee 2012, kuwaas oo kala ahaa asixinta Mashaariicda sharci iyo ansixinta ama diidmada Mooshinada Golaha dhexdiisa ka dhasha iyo ansixinta Miisaaniyada Qarankaba, hadaba waxaanu halkan ku xusney go'aamada gaarka ah ee Goluhu gaadhey:-

No	Taariikhdi Go'aanka la gaadhey	Ujeedada Go'aanka
01	05.02/2012	Wax iyo Kaabista Xeerka ka qaybgalida Shirarka caalamku qabanayo Somalia
02	21/02/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka La-dagaalanka Budhcad Badeeda Xeer Lr.52/2012
03	21/02/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Wareejinta Maxaabiista Xeer Lr.53/2012
04	17/03/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Maaliyada Md. C/casiis Maxamed Samaale
05	15/03/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka La-dagaalanka Budhcad Badeeda Xeer Lr.52/2012
06	15/03/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Wareejinta Maxaabiista Xeer Lr.53/2012
07	23/03/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Baanka Dhexe Xeer lr. 54/2012
08	03/04/2012	Go'aanka Ansixinta Miisaaniyada Qaranka sanadka 2012 iyo lifaaqyada ku lamaan
09	21/11/2012	Go'aanka ansixinta Xeerka ilaalinta Anshaxa iyo Nabadgalyada Guud
10	01/07/2012	Go'aanka Ansixinta Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka a doorashoyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha deegaanka Xeer Lr.20/2001
11	16/07/2012	Go'aanka Ansixinta Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka doorashoyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha deegaanka Xeer Lr.20/2001
12	07/08/2012	Kal-fadhigii 12aad ee aan caadi ahayn iyo Go'aanka Ansixinta Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka a doorashoyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha deegaanka Lifaafa 5aad Xeer Lr.20/2001
13	08/07/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada warfaafinta iyo wacyigalinta Md. Cabdi Yuusuf Ducaale (Boobe)

14	08/07/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta Md. Cali Cilmi Geele
15	08/07/2012	Go'aanka Ansixinta Gudoomiye Ku-xigeenka Hay'ada Shaqaalaha Dawlada Md. Maxamed Cumar C/laahi
16	08/07/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Gudaha Md. C/laahi Abokor Cismaan
17	08/07/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada Md, Mawliid Maxamud Ibraahim
18	08/07/2012	Go'aanka Ansixinta Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada Md. Nuux sh. Muuse Ducaale
19	02/09/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Baananka Islaamiga ah Xeer Lr. 55/2012
20	17/09/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Wadamarista Gaadiidka Xeer Lr. 56/2012
21	17/09/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka Xeer Lr. 57/2012 ee Guurtida u gudbey.
22	22/09/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigalinta Md. C/laahi Maxamed Daahir (Cakuse)
23	22/09/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Md. Maxamud Axmed Barre (Garad)
24	22/09/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiiru-dawlaha Wasaarada Maaliyada Md. Cisman C/laahi Saxardiid
25	22/09/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha iyo dhaqanka Md. Cali Siciid Reygal
26	22/09/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiiru-dawlaha Nabadgalyada Gobolada Bari Md. Keyse Cabdi Yuusuf
27	22/09/2012	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Warfaafinta iyo Wacyigalinta Md. Abiib Diiriye Nuur
28	14/10/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul-wanaaga Xeer Lr. 58/2012
29	15/10/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer Lr. 59/2012
30	23/10/2012	Go'aanka Ansixinta Wax ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Gudidda Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer Lr. 19/2001 ee Guurtida u gudbey
31	05/11/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer Lr. 59/2012

32	10/11/2012	Go'aanka Ansixinta Wax ka-badalka iyo Kaabista Xeerka Gudidda Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer Lr.19/2001 ee Madaxweynaha u gudbey.
33	25/12/2012	Go'aanka Ansixinta Ajendaha Kal-fadhiga 20aad ee Golaha Wakiilada.
34	10/12/2012	Go'aanka Ansixinta Xeerka Baadhista iyo Ilaalinta Hilibka Xeer Lr. 57/2012 ee Madaxweynaha u gudbey.
35	30/12/2012	Go'aanka Ansixinta Miisaaniyada Dawlada Sanadka 2013ka iyo lifaaqyada ku lamaan.

11. Fadhiyadii Wada Jirka ahaa ee Labada Gole:-

- Fadhi wada jira ayay labada Gole Baarlamaan ee (Guurtida iyo Wakiilada) yeesheen 14/02/2012 kaas oo ay ku dhegeysteen Khudbad sanadeedkii Madaxweynaha ee 2012ka.
- 05/02/2012 waxaa fadhi wada jira yeeshey Laba Gole, fadhigaas oo wax ka-badal iyo kaabis lagu sameeyay Xeerka ka qeybgalka shirarka caalamiga ah ee Somalia iyo Somaliland loo qabto, fadhigaas oo uu ka soo qeybgaley Wasiirka Arrimaha Dibada Somaliland Faah-faahina ka bixiyay baahida wax ka-badalka Xeerkaas.

12. Website Cusub oo Sanadkan la hirgaliyay:-

Website Cusub oo lagala soconayo Shaqada iyo Waxqabadka Golaha Wakiilada ayaa la hirgaliyay intii lagu jiray sanadka 2012ka, Waxyaalaha loo aas aasay website-ka waxaa kamida in dadweynuhu ogaadaan lana socdaan Hawsha uu Goluhu hayo, in dadweynuhu la socdaan Xeerarka kasoo baxa Golaha, kuwaas oo saamayn toos ah ku leh dadweynaha.


Mudadaas uu jirayna dadaal wayn oo la sameeyay darteed waxaad xaga hoose ka arki-kartaan sida ay u kordhayaan maalinba maalinta ka dambaysa dadweynaha soo booqanaya ee ku xidhan website-ka Golaha wakiilada si ay u helaan macluumaad dheeraad ah.

Waxaa halkan idiinku lifaaqan table faah-faahsan oo ka waramaya dadkii soo booqday website-ka iyo tirada bogaga la booqday, waxaa kale oo mudan in la sheego in mudadaas uu jiray xeerar aad u badan lala dagay, halkaas oo aad ka dareemi karayso dadku baahida ay u qabeen inay helaan meel ay kala socdaan warbinaha iyo xeerarka la ansixiyay.

Warbixinta website-ka ee intuu uu jiray iyo dadka soo booqday ilaa xiligaa, Intaas waxa kale oo aan halkan ku xusayaa in pages-ka labooqday ay

tiradoodu tahay **83,127** page iyadoo sidoo kale ay aad u badanyihiin xeerarka iyo Warbixinaha la dajistay (downloaded):-

Months	Number of visitors	Number documents Downloaded
April	474	2900
May	722	7220
June	898	5442
July	1189	5001
August	933	10637
September	1082	9293
Oct	1364	13547
Nov	1617	13992
Dec	1518	15095
Total	9797	83127



13. Wax-qabadkii Gudiyada Golaha:-

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga

Wax-qabadka Gudidda Dhaqaaluhu waxaa ka mid ah:-

- ka soo talo-bixinta Odorska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2012
- Dersida iyo ka talo-bixinta Ansixinta Wasiirka Maaliyada Md. C/casiis Maxamed Samaale.

- Soo dersida iyo ka soo talo-xibinta Miisaaniyada Qaranka 2013 oo ahayd miisaaniyadii ugu horeysay ee wakhtigeedii ku timaada Golaha laguna ansixiyo.
- Waxa kale oo Gudiddu Golaha u soo gudbisay Xeerka Maamuuska M/weynaha, Ku-xigeenka Madaxweynaha iyo Mudanayaaasha Golayaasha Xeer-dejinta.

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Gudiddu waxay Golaha uga soo talo-bixisay in xilka loo ansixiyo Masuuliyiinta kala ah:-

- Wasiirka Wasaarada Warfaafinta Md. Cabdi Yuusuf Ducaale (Boobe)
- Wasiirka Wasaarada Warfaafinta Md. Abiib Diiriye Nuur
- Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha iyo Dhaqanka Md. Cali Siciid Reygal
- Wasiir kuxigeenka Wasaarada Warfaafinta Md. C/laahi Maxamed Cakuse

25/05/2012 Guddidu waxay socdaal kormeera ku tageen Gobolada Saaxil iyo Togdheer

19/06/2012 Guddidu waxay qabatey Kulan laga hadlayay Arrimaha Caafimaadka oo ay ka caawisey Hay'adda IRI looguna Magacaabey Health Caucus affairs in Somaliland waxaana ka qeygalaey 7 mudane iyo Wasiir kuxigeenka iyo Agaasimaha Wasaarada Caafimaadka.

02/07/2012 Guddidu waxay la kulantey Gudoomiyaha iyo Ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha iyagoo markey soo derseen Golaha uga soo talo-bixiyay Ansixintooda.

11/07/2012 Guddidu waxay mar labaad qabatey Kulan laga hadlayay Arrimaha Caafimaadka oo ay ka caawisey Hay'adda IRI looguna Magacaabey Health Caucus affairs in Somaliland, waxaana ka qeygaley 10 mudane oo 3 Guddida ka tirsan tahay, waxayna soo kormeereen Xarumaha Caafimadaad ee Magaalada Hargiesa

Gudidda Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

29 April 2012 Guddida Garsoorka, Cadaalada, Dastuurka iyo Xuquuqal Insaanka ee Golaha Wakiilada JSL oo safar shaqo ugu baxay labada gobol ee Sool iyo Sanaag, safarkoodan shaqo waxay ugu kuurgalayaan baahida garsoor ee taala labadaas Gobol iyo Xukunada cadliga ah ee ay helaan maxaabiista ku xidhan xabsiyaddaasi Gobol iyo Guud ahaan nidaamka garsoor ee yaala labadan Gobol.

Gudidda Khayraadka Dabiicida ah iyo Deegaanka

Gudiddu Taariikhdu markay ahayd **19/04/2012** ayaa waxaa kormeer balaadhan oo mudo Shan cisho ah qaatay ku tageen Gobolka Sool koox ka tirsan Gudida iyo xildhibaano kale waxaana kormeerkaani uu daba socdey mid ka horeeyey oo ku saabsanaa u kuurgal xaga deegaanka oo ay koox xildhibaano ahi kusoo mareen Gobolka Awdal

23/04/2012 Gudiddu waxay socdaal qaatay muddo lix cisho ah ugu anbabaxay Gobolka **Sanaag** koox xildhibaano ah oo ay horkacayaan Guddida Deegaanka iyo Khayraadka dabiiciga ah ee Golaha Wakiilada JSL, kormeerkaaso oo ku saabsanaa sidii kuwii ka horeeyay Xaalada Deegaanka ee Gobolkaas.

Gudiddu Golaha waxay Goleweynaha u soo gudbisey:-

- Xeerka Baadhista iyo Ilaalinta Fayo-dhowrka Hilibka

Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

03/10/2012 waxay guddidu kulan xog waraysi ah xafiiskeeda kula yeelatay taliyaha Hay'ada sirdoonka qaranka, kulankaas oo ay su'aalo kaga weydiisay Xeerka hay'ada sirdoonka qaranka oo ay guddidu gacanta ku haysey xiligaas.

Waxa kale oo Gudiddu Golaha uga soo talo-bixisay in Xilal loo Ansixiyo Masuuliyiinta kala ah:-

- Wasiiru Dawlaha Nabadaynta Gobolada Bariga Md. Keyse Cabdi Yuusuf
- Wasiir-dawlaha Arrimaha Barriga Md. Keyse Cabdi Yuusuf
- Wasiir-xigeenka Amniga ee Wasaarada Arrimaha Gudaha

Xeerarka ay Gudiddu Golaha u soo gudbisey waxay kala ahaayeen sidan:-

- Xeerka Nabadgalyada Guud iyo Anshaxa
- Xeerka Kootada Dumarka iyo Dadka laga tirade badan yahey
- Xeerka Booliiska
- Xeerka Aasaaska Hay'ada Sirdoonka Qaranka
- Xeerka La-dagaalanka Budhcad badeed
- Xeerka Wareejinta Maxaabiista

Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

- Gudiddu waxay laba jeer kulamo dadweyne u qabatey Xeerka Komishanka Maamulwanaaga iyo Ladagaalanka Masuqmaasuqa oo Gudiddu Gacanta ku heysay.
- Waxay guddidu kulan Xog iswaydaarsi ah la yeelatay 4 kulana la qaadatay Hantidhawraha Guud ee Qaranka.

- Waxa 05/07/2012 kulan xog iswaydaarsi ah la yeelatay Xisaabiyaha Guud ee Qaranka
- Waxay kale oo kulano xog-ogaalnimo iyo iftiimin shaqooyinka ay qaranka u hayaan ah la yeesheen masuuliyiintan qaran ee hoos ku qoran Gudoomiyaha Baanka Dhexe ee JSL, Komishanka maamul wanaaga iyo la dagaalanka Musuq Maasuqa, Wasiirka wasaarada Hawlaha Guud iyo Guryaynta, Wasiirka wasaarada Ganacsiga iyo warshadaha Wasiirka wasaarada Kaluumaysiga iyo khayraadka bada iyo Agaasimaha guud ee wasaaradaas Agaasimaha Miisaaniyada ee wasaarada Maaaliyada.
- Waxay Gudidu Golaha u soo jeedisay in dib u celiyo xisaab xidhada Sanadaha 2010 iyo 2011, iyadoo Xisaab xidhadhadaas Goluhu ku celiyay Xukuumada gaar ahaan Hanti-dhowraha Guud.
- Waxay sidoo Kale Gudiddu Golaha u soo Gudbisey Xeerka Komishanka Maamul Wanaaga oo Gudiddu gacanta ku heysay kana soo shaqaysay.

Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga iyo Qorsheynta

Gudiddu waxay ka soo talo-bixisey Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada Md. Mawliid Maxamuud.

04/08/2012 Gudidda Arrimaha Dibada, iskaashiga Caalamiga iyo Qorsheynta Qaranka waxay kulan xogwareysi la yeelatay Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada Md. **Maxamed C/lahi Omar** iyo **M. Mawliid Maxamud**, Wasiiradu waxay Gudidda Xogwareysi ka siiyeen, Hawlaha Qaran ee Wasaaradoodu Xukuumada u qaabilsantahay sida siyaasad Arrimaha dibada, Xidhiidhka Caalamiga ah, Wada hadaladii Somaliland iyo Somaliya, IGAD.

05/08/2012 waxay Gudidda Arrimaha Dibada, iskaashiga Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranka waxay kulan xogwareysi la yeelatay Wasiirka Wasaarada Qorsheynta Md. **Dr, Sacad Cali shire**, oo Gudidda u yeedhay si ay wax uga waydiisyo Hawlaha shaqo ee wasaaradu qaabilsantahay halkay marayaan, sida Qorshihii 5 sano (5 years plan 2012-2016) halkuu marayo, Qorshayaasha kale ee Wasaarada u yaala iyo guud ahaanba waxyaabaha Wasaarada u qabsoomey iyo waxaan u qabsoomin oo sababeysan.

14. Waxqabadkii Guddi Gaarka ah (Ad hoc Committees):-

Waxaa Guddi Hawleed gaara loo saarey Ka soo talo bixinta Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul Wanaaga oo Goluhu ka doodey, Guddidaas oo kala ahayd.

1. Md. Xuseen Maxamed Cige
2. Md. Abuubakar C/raxman Good
3. Md. Xasan Cawaale Caynaan
4. Md. C/raxman Yusuuf Cartan
5. Md. Cali Xasan Maxamed

6.

15. Mudanayasha Xubinimadoodii waayay lana badaley:-

Intii lagu jirey sanadka 2012ka waxaa Shirgudoonka Golaha Wakiiladu ka dib markuu arkey **Qodobka 50^{aad} F/5^{aad}** ee Dastuurka Qaranka iyo **Qodobada 14^{aad} F/2^{aad}** ee Xeerka Doorashooyinka Golaha Wakiilada iyo **Qodobka 4^{aad} F/3^{aad}** ee Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiilada, waxaa xilkii Xubinimo ee Golaha Wakiilada Waayay Mudanayaashan kala ah:-

No	Mudanayaasha Waayay Xubinimadoodii	Mudanayaasha buuxiyay
1.	Md. Maxamed Cali Jibriil	Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac (Kulmiye)
2.	Md. Mahdi Xasan Sugaal	Md. C/qaadir Jibriil Tukaale
3.	Md. Ikraan X. Daa'uud	Md. Yaasiin Cali Warsame
4.	Md. Axmed Maxamed Cali (Beegsi)	<p>Md. Fu'aad Sh. Muxumed Cabd<u>Waxqabadkii Guddi Gaarka ah (Ad hoc Committees):-</u></p> <ul style="list-style-type: none"> ➤ Kulan Cilmiyeed loo qabtey Xeerka Booliiska oo ka soo qeygaleen Taliyaha iyo Saraakiil Booliisa, Wasaarada Arrimaha Guddaha iyo hay'adaha kale ee Xeerku khuseeyo. ➤ Kulan cilmiyeed loo qabtey Xeerka Statistics oo ka soo qeybgaleen <p>ale</p>

18. Aqoon isweydaarsiyadii iyo Kulamadii Guddiyada ee Gaar-gaarka ahaa:-

- Kulan Cilmiyeed loo qabtey Xeerka Booliiska oo ka soo qeygaleen Taliyaha iyo Saraakiil Booliisa, Wasaarada Arrimaha Guddaha iyo hay'adaha kale ee Xeerku khuseeyo.
- Kulan cilmiyeed loo qabtey Xeerka Statistics oo ka soo qeybgaleen hay'adaha iyo aqoonyahanada aqoonta u leh, laguna qabtey Hargeysa.
- Kulan cilmiyeed loo qabtey Xeerka Statistics oo ka soo qeybgaleen hay'adaha iyo aqoonyahanada aqoonta u leh, laguna qabtey Burco.
- Tababar aqooneed hor dhac u ah xeerka komishanka maamulwanaaga iyo ladagaalanka Masuqmaasuqa.
- Kulan Guddida Arrimaha Guduhu u qabatey Xeerka Hay'ada Sirdoonka Qaranka oo ka soo qaybgaleen Rag badan aqoon arrimaha Sirdoonka.

19. Safarada Dibada:-

Safarkii Gudoomiya iyo Gudoomiye Ku-xigeenka 2^{aad} ee Namiibiya:- waxa safar shaqo ku tagay Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/laahi** iyo Gudoomiye Ku Xigeenka 2^{aad} **Md. Dr. Cali Yuusuf** 22 - 27 april 2012, waxay halkaa u tageen martiqaad ay ka heleen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Namiibiya (Speaker of the National Assembly) **Hon. Dr. Theo-Ben Gurireb** Mudadii ay jooheen si maamuus heer sare ah ayaa loogu soo dheweeyay halkaas.

Iyagoo Mudadaas la kulmey Madax badan oo ay ka mid yihiin Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **dalkaas Hon. Dr. Theo-Ben Gurireb**, Gudoomiye Ku-xigeenka **Hon. Loide** oo gabadh ah **Hon. Prof Peter** SWAPO party chief Whip iyo Xildhibaano kale, Dhinaca Xukuumada waxay shirar la qaateen Gudoomiyaha Gobolka Caasimadu ku taallo iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada iyo Reysal Wasaaraha Dalkaas Namiibiya.

Safarkii Shaqaalaha ee Itoobiya:- Shaqaale uu Gudoominayay Xoghaya Guud ee Golaha Wakiilada **Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle**, ayaa safar tababar ku tagay 16-22/052012 safarkan oo ay Xoghayaha ku wahelinayeen, Agaasimaha Waaxda Hadal Qoraalka **Mr. Cawad Cali Maxamed**, Agaasimaha Qorsheynta **Mr. C/nasir Cisman Maxamud**, Agaasimaha Protocolka Mr. **Yuusuf Maxamed Aadan** iyo Labada Xoghaymood ee Gudiyada arrimaha Bulshada iyo Garsoorka iyo Cadaalada Mr. **Axmed Maxamed Cige** iyo **Mr. C/laahi Cabdi Aadan** waxay ku soo qaateen barlamaanka Federalka Itoobiya tababar sida uu u shaqeeyo barlamaankaasi iyo waxyaabo waayo aragnimo iyo khibrad ay ka korodhsadeen, iyagoo la sheergareeyay shaqaalaha Barlaamkaasi siday labada barlamaan u shaqeeyaan.

Safarkii Gudoomiyaha:- Guddoomiyaha baarlamaanka Somaliland **Md. Abdiraxmaan Maxamed Abdillaahi (Abdiraxmaan Cirro)** Wasiirkii hore ee arrimaha dibadda **Marwo Adna Aadan Ismaciil** iyo **Xildhibaan Abdiqaadir Xaji Ismaciil Jirde** oo ka mid ah Golaha Wakiilada Somaliland ayaa ka qaybgalay shir ka dhacay Wadanka Belgium Caasimadiisa Brussels’.

Wafiti uu hogaaminayo Guddoomiye xigeenka 2^{aad} ee Golaha Wakiilada **Mudane Dr. Ali Yusuf Ahmed** iyo **Guddoomiyeyaasha Sideeda Guddi-hoosaad** ee uu ka kooban yahay aqalka Wakiilada Baarlamaanka Somaliland ayaa Safar ku tagey Baarlamaanka Dalka aynu jaarka nahay ee itoobiya martiqaad ay ka heleen Xubnaha ku wehelinayay Gudoomiyaha Safarkaana waxay kala ahayen.

1. Mud. Saed Elmi Rooble-----Gud. Guddida Arrimaha Guddaha iyo Difaaca.
2. Mud. Ahmed Nour Kijandhe----Gud. Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta.

3. Mud. Saed Moh'ed Elmi--Gud. Guddida Deegaanka iyo Kheyraadka dabiiciga.
4. Mud. Aden Tarabi Oogle. -----Gud. Guddida ilaalinta Hantida Qaranka.
5. Mud. Hussein Mohamed Egeh.--Gud. Guddida Arrimaha Dibada
6. Mud. Ahmed Diriye Nac-nac. ----Gud. Guddida Joogtada iyo Anshaxa.
7. Mud. Mohamed Mohamoud Omer Hashi.--Gud. Guddida Dhaqaalaha
8. Mud. Abdirahman Osman Alin.--Gud. Guddida Gar, Cad. Iyo X.Insaanka. iyo
9. Abdinasir Osman Mahamoud.---Agg. Qorshaynta ee Golaha wakiilada
- 10.

➤ **2-3 December 2012** waxaa safar ugu baxay Magaala Madaxda Dalka aynu jaarka nahay ee Djabuuti **Md. Axmed Maxamed Kijaandhe iyo Md. Axmed Ducaale Bulaale**, safarkaas oo Martiqaad ay Ururka dalalka Geeska Afrika ee IGAD ku casuuntey labadaa Xubnood oo ka tirsan Guddida Arrimaha Bulshada si ay uga qeybgalaan shir lagawada hadlayay Caafimaadka oo ka dhacay Magaalada Jabuuti.

➤ **Ethiopia:- 08 December 2012** waxaa Safar ugu baxay martiqaad ay ka heleen dalka aynu jaarka nahay ee itoobiya Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/laahi**, Gudoomiye Ku-xigeen laad **Md. Baashe Maxamed Faarax** iyo Xoghayaha Guud **Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle**, martiqaadkan oo Barlamaanka itoobiya ku casuumey ka qaybgalka Xuska iyo Dabaaldega Maalinta Qoomiyadaha Itoobiya oo ka dhacdey dalkaasi.

20. Wufuudii Golaha Timi:-

Wafti ay hogaaminayso **Md. Ifraax Cali Kirix** oo ka tirsan Golaha deegaanka ee Magaalo kamida dalka Sweden ayaa maanta la kulmay Guddida Arrimaha Dibada Golaha wakiilada iyadoo ay waheliyaan laba journaliste **Anna Ryterhabrant iyo Alexandra Sredberg**, ugu horeyn waxaa kulanka ka hadlay Md. Naasir X. Cali shire oo soo dhaweeyay waftiga isla markaana warbixin kooban ka siiyay dalka gaar ahaan Golaha wakiilada sheegayna muhiimada in ay aad ugu faraxsanyihiin in Md, Ifraax oo u dhalatay dalka Somaliland asal ahaan ay soo booqato dalkeeda, sidoo kale waxaa halkaa hadalo ka jeediyay Md. Saleban Yusuf Cali Koore, Md, C/kariim Aw Cali shabeel iyo Md. Baar Siciid faarax oo ka tirsan Golaha Wakiilada iyagoo xusey in Md. Ifraax booqashadeedu wax weyn u tarayso xidhiidhka laba dal ee Sweden iyo Somaliland.

Sidoo kale, waxaa booqasho ku yimi Dalka intii lagu jiray Kal-fadhiga 17aad Wafti ka socda Barlamaanka Dalka aynu jaarka nahay ee Djabuuti, waftigaas oo ka koobanaa shan (5) oo Mudane dumar ahaa ayna Hogaaminaysay **Md. Caasha** waxaa si weyn loogu soo dhoweeyay dalka

iyadoo Goluhu hormood ka ahaa soodhweyntaas, waxaana ay shir la yeeshen Shirgudoonka, isla markaas waxay Gudoomiyaha Waftigaa hogaaminayay fadhi Golaha oo lagu qaabiley ka jeedisay hadal iyadoo aad ugu mahadnaqdey Golaha Wakiilada iyo dadweynaha Somaliland ee sida fiican u soo dhoweeyay waxayna xustey in booqashadooda ay ahayd mid ay dalkoodii 2aad yimadeen waxayna ka hadashay doorka Haweenka ee ka qaadashada talada iyo in loo baahan yahay in Mudanayaal badan oo dumar ay ka mid noqdaan Golahaayaasha la soo dooranayo.

Waxaa kaloo Golaha Yimi Wafti ka socday dalka Holland waftigaas oo Shirgudoonku soo dhoweeyay isla markaana kulan balaadhan oo dhinacyo badan taabanaya la yeeshay, Wefti ka Socda Holland oo uu horkacayo **Ambassador: Joost Reintfest**, kulankaasi oo ka dhacay xafiiska Gudoomiyaha Golaha Wakiilada.

Kulankan oo ahaa xogwaraysi ku saabsan xaalada dalka gaar ahaan baarlamaanka iyo hawlihiisa waxaa warbixin balaadhan weftiga ka siiyey Gudoomiye ku xigeen 1^{aad} ee Golaha Wakiilada **Md. Baashe Maxamed Faarax iyo** Gudoomiye Ku-xigeenka 2^{aad} **Md. Cali Yuusuf.**

Waxaa ay Gudoomiyayaashu uga war-bixiyeen weftiga miisaaniyada u gaarka ah Golaha Wakiilada iyo sida uu hawlihiisa ugu maareeyo, xiligii Golahan hada jooga la doortay oo ahayd 2005 tii, waxaa kale oo tilmaameen in dalka Somaliland sanadkasta uu galo doorasho tusaale ahaan in 2013 ay ku began tahay doorashada baarlamaanku halka 2015 kana ay began tahay doorashada madaxtooyadu sanadkanka la sugay Doorashadii Golayaasha Deegaanka.

Waxaa kale oo mudanayaashu weftiga u cadeeyeen in carqabado badan oo haystaa Somaliland ay jiraan taas oo ay ugu weyntahay ictiraaf la'aan aanay Somaliland weli beesha caalamka ka helin aqoonsi caalamiya kaas oo wax badan kala maqan.

Dhinaca kale waxaa ay Gudoomiyayaashu ay mahad naq balaadhan usoo jeediyeen Hay'ada AWEBA oo iyada la shaqaysa baarlamaanada aduunka taas oo wax badan ka qabatay Golayaasha qaranka Somaliland , sida uu tilmaamay Md.baashe waxaa uu sheegay in baarlamaanku uu ku shaqayn jirey qalab gaboobey wixii 2005 tii ka horeeyey laakiin hada ay isticmaalaan qalabkii ugu danbeeyey kaas oo ay Hay'ada AWEBA ka caawisay baarlamaanka, waxaa kale oo waxyaabo badan ka qabatay kor u qaadida aqoonta shaqaalaha iyadoo tababaro u fidisay.

Mr.joost ayaa waxaa uu sheegay in uu 1986 Somaliland yimid xiligaas oo uu booqday meelo badan oo Somaliland kamida ah sida Saylac iyo Berbera uuna faraq weyni u dhexeeyo xiligaas iyo hada oo uu timaamay in Somaliland ay ku talaabsatay haruumar balaadhan.

Gudoomiyayaashu waxaa ay isbarbar dhig kuseemeeyeen baarlamaanka Somaliland iyo ka Nammibiya oo ay dhowaan booqasho shaqo ku tageen

kaas oo ay tilmaameen in faraq weyni u dhexeeyo tusaale ahaan miisaaniyada baarlamaanka Namibiya ayaa waxaa ay noqonaysaa boqol iyo konton million taas oo aad uga badan miisaaniyada Qaranka Somaliland.

Ugu danbayntii waxaa ay weftiga kusoo wareegeen labada hole ee baarlamaanka guurtida iyo Wakiilada kuwaas oo ay dhismihiisa hirgelisay Hay'ada AWEBA iyada oo uu hada dhamaad ku dhowyahay hole Golaha guurtida oo iyada oo isaga dhowaan labilaabay. Magacyada weftiga **Ambassador: Joost Reintjes Hans Fabeia from ministry of foreign affairs.**

18. Ka qeyb-qaadashadii Hawlaha Guud ee Qaranka:-

Mudanayaasha Golaha Wakiilada waxay si rasmiya uga qeybqaateen si ay doorashadii Golayaasha Degaanku dalka si nabadgalyo ah uga dhici lahaayeen, waxay mudanayaashu u kala baxeen Gobolada iyo degmooyinka dalka waxayna door muhiima ka qaateen ololihii iyo si ay habsami doorashadu guud ahaan ugu qabsoomi lahayd.

19. Mahadhooyinka sanadka 2012ka:-

Mahadhooyinka sanadkii tagey waxaa ka mida Doorashooyinkii Golayaasha Deegaanka ee ka dhacdey 28kii November 2012 oo ka qeybgaleen 4 urur siyaasadeed 2 xisbi, doorashadaas oo lagu soo doortey Golayaasha Deegaanka dhamaan degmooyinka Somaliland sidoo kale ay ku soo baxeen 3 xisbi qaran oo noqonaya saddexda Xisbi Qaran ee sida rasmiga ah uga jiraya Somaliland, inkastoo doorashadaasi ay ka dhalatey buuq iyo Mudaharaadyo hadana Guud ahaan si nabadgalyo ah ayay dalka uga qabsoontey.

Appendix

Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiilada:-

No.	Magaca	Gobolka	Xisbiga
1.	Abuubakar C/raxmaan Good	Awdal	Kulmiye
2.	Ikraan Xaaji Daaud Warsame	Awdal	Kulmiye
3.	Mahdi Xuseen Cadare	Awdal	Kulmiye
4.	C/laahi Axmed Yuusuf (Madar)	Awdal	UCID
5.	Mahdi Cabdilaahi Maxamuud	Awdal	UCID
6.	Muuse Maxamed Ismaaciil Waabari	Awdal	UCID
7.	Axmed Maxamed Maxamuud (Afweyne)	Awdal	UDUB
8.	Axmeed Barkhad Obsiye	Awdal	UDUB
9.	Cabdi Maxamuud Jaamac Gaagaale	Awdal	UDUB
10.	Cali Sheekh Ibraahin Araye	Awdal	UDUB
11.	Mahdi Xaaji Xasan Sugaal	Awdal	UDUB
12.	Maxamed Barkad Miigane	Awdal	UDUB
13.	Maxamed Yaasiin Sheekh Cali Ayaanle	Awdal	UDUB
14.	Axmed Cabdi Nur Kijaandhe	Hargeisa	Kulmiye
15.	Axmed Ibraahin Daahir (Axmedweyne)	Hargeisa	Kulmiye
16.	Axmed Maxamed Diiriye NacNac -	Hargeisa	Kulmiye
17.	C/laahi Xuseen Cige (Blacky)	Hargeisa	Kulmiye
18.	Cali Yuusuf Axmed Jaamac	Hargeisa	Kulmiye
19.	Ibraahin Axmed- Haybe	Hargeisa	Kulmiye
20.	Maxamed X Maxamuud Cumar Xashi	Hargeisa	Kulmiye
21.	Maxamuud Axmed Obsiye	Hargeisa	Kulmiye
22.	Bashir Sheekh Xuseen Tukaale	Hargeisa	UCID
23.	Cabdiraxmaan Cismaan Caalin	Hargeisa	UCID
24.	Ibraahin Mahdi Buubaa	Hargeisa	UCID
25.	Khadar Aadan Xuseen	Hargeisa	UCID
26.	Maxamed Baaruud Shide	Hargeisa	UCID
27.	Xaashi Xuseen Caabi	Hargeisa	UCID
28.	Aadan Muxumed Hoorri (Mataan)	Hargeisa	UDUB
29.	C/kariim Aw- Cali Shabeel	Hargeisa	UDUB
30.	C/qaadir XIsmaaciil Jirde	Hargeisa	UDUB
31.	Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac	Hargeisa	UDUB
32.	Cali Obsiye Diiriye (Gabiley)	Hargeisa	UDUB
33.	Xasan Cawaale Caynaan	Hargeisa	UDUB
34.	Maxamed Xuseen X Ciisse	Saaxil	Kulmiye
35.	Siciid Cilmi Rooble	Saaxil	Kulmiye
36.	Axmed Maxamed Cali (Beegsi)	Saaxil	UCID
37.	C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)	Saaxil	UCID
38.	Faarax Maxamuud Cabdulle	Saaxil	UCID
39.	Maxamed Faarax Qabiile	Saaxil	UCID
40.	Aadan Xaaji Diiriye Dirir	Saaxil	UDUB
41.	Axmed Xasan Aadan Waysocadde	Saaxil	UDUB
42.	Maxamed Nuur Carraale	Saaxil	UDUB
43.	Maxamuud Jaamac Xaaji Cilmi (Dable)	Saaxil	UDUB

44.	Cabdiraxmaan Yuusuf Cali Cartan	Sanaag	Kulmiye
45.	Cali Maxamed Aadan Cali Barre	Sanaag	Kulmiye
46.	Ibraahim Jaamac Cali Maxamed Reyte	Sanaag	Kulmiye
47.	Maxamed Cismaan Maxamed Bulqaas	Sanaag	Kulmiye
48.	C/raxman Maxamed Talyanle	Sanaag	Kulmiye
49.	Maxamed Cali Jibriil	Sanaag	UCID
50.	Saleebaan Cawad Cali	Sanaag	UCID
51.	Baar Siciid Faarax	Sanaag	UDUB
52.	Cabdiqaadir Jaamac Xaamud	Sanaag	UDUB
53.	Ibraahin Carraale Cabdi (Ruush)	Sanaag	UDUB
54.	Ibraahin Maxamed Xusen (Dhadheere)	Sanaag	UDUB
55.	Maxamed Saalax Cige	Sanaag	UDUB
56.	Axmed Ducaale Bullaale	Sool	Kulmiye
57.	Baashe Maxamed Cabdi	Sool	Kulmiye
58.	Ibraahin Axmed Reygal	Sool	Kulmiye
59.	Maxamed Jaamac Cabdi	Sool	Kulmiye
60.	Cabdiqaadir Askar Xasan	Sool	UCID
61.	Siciid Maxamed Cilmi	Sool	UCID
62.	Aadan Tarabi Oogle	Sool	UDUB
63.	Cabdiraxmaan Muuse	Sool	UDUB
64.	Maxamed Axmed Maxamud (Dhakool)	Sool	UDUB
65.	Maxamuud Dhunkaal Gutaale	Sool	UDUB
66.	Saleebaan Yuusuf Cali Koore	Sool	UDUB
67.	Xariir Siciid Bullaale	Sool	UDUB
68.	Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)	Tog-dheer	Kulmiye
69.	Maxamed Cumar Aadan	Tog-dheer	Kulmiye
70.	Maxamed Cali Xirsi	Tog-dheer	Kulmiye
71.	Maxamed X Yuusuf Axmed (Waabeeyo)	Tog-dheer	Kulmiye
72.	Xamse Maxamed Gaadaweyne	Tog-dheer	Kulmiye
73.	Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan)	Tog-dheer	Kulmiye
74.	Jaamac Xasan Aadan	Tog-dheer	UCID
75.	Maxamed Jaamac Cali	Tog-dheer	UCID
76.	Naasir Xaaji Cali Shire	Tog-dheer	UCID
77.	Xuseen Maxamed Cigeh	Tog-dheer	UCID
78.	Axmed Maxamed Nuur Maxamed	Tog-dheer	UDUB
79.	C/casiis Ismaaciil Ducaale	Tog-dheer	UDUB
80.	Cali Xaaji Maxamed Muuse	Tog-dheer	UDUB
81.	Farxaan Maxamed Cali	Tog-dheer	UDUB
82.	Xuseen Ismaaciil Yuusuf	Tog-dheer	UDUB

Liiska Shaqaalaha Golaha Wakiilada:-

No.	Magacayda	Shaqada.
	Abdirisaksa'edayanle	Xoghayaha Guud
	Jamal Jama Hassan	Xoghaye ku-xigeenka
	Abdi Ismaaciil Xawadle	Ag. Waaxda Maamulka iyo Xisabadka
	Ahmed Ali Kahin	La-taliye Sharci

	Awad Ali Mohamed	Ag. Waaxda H/qoraalka iyo Gudiyada
	Mahamuod Sulamen Omer	Ag. Waaxda ICT
	Mustafe Mohamed Dahir	La-taliye Sharci
	Abdinasir Osman Mahamoud	Ag. Waaxda Qorsheynta
	Hibo Mohamed Ibrahim	Ag. Waaxda Xusuus dhowrka
	Ismahan Yusuf Ibrahim	Ag. Waaxda Shaqaalaha
	Ahmed Mohamed Eige	Xog. Gudidda Arrimaha Bulshada
	Sulieman Abdisitar Dubad	Xog. Gudidda Ilaalinta Hantida
	Huda Mohamed Ahmed	Xogheynta Xoghayaha Guud
	Hamse Mohamed H. Muse	Head of Logistics
	Farah Ibrahim Gamute	Xisaabaadka
	Sahal Guuleed Xadi	Xogheynta Gudidda Dhaqaalaha
	Asiya Rashiid Egge	Xusuus dhowrka
	Aydarus Egeh Khayre	Daabacaada
	Ali Axmed Ibrahim	Hadal-qoraalka
	Ayanle Ahmed Abdi	Xog. Gudidda Joogtada
	Yusuf Habib Husein	Xog. Gudidda Kh/dabiciga iyo Deganka
	Mubarig Farah Warsame	Xog. Gudidda Arrimaha Gudaha
	Faysal Ibrahim Cise	Xog. Gudidda Arrimaha DIBada
	Abdillahi Abdi Adan	Xog. Gudidda Cadaalada iyo X/insanka
	Mohamed Sa'eed Husein	Xisaabaadka
	Abdirahman Aydiid Abokor	ICT technical
	Mustafe Nuur Faarax	Xafiiska Shaqaalaha
	Siciid Jirde Heybe	Camera Man
	Ahmed Osman Farah	
	Ahmed Farah Bodhle	

C/risaaq Siciid Ayaanle

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

Filename: 2012 Yearly Report
Directory: C:\Users\CAWAD\Documents
Template: C:\Users\CAWAD\AppData\Roaming\Microsoft\Templates\Normal.
dotm
Title:
Subject:
Author: CAWAD
Keywords:
Comments:
Creation Date: 11/01/2017 19:47:00
Change Number: 38
Last Saved On: 06/03/2017 21:40:00
Last Saved By: CAWAD
Total Editing Time: 119 Minutes
Last Printed On: 06/03/2017 23:01:00
As of Last Complete Printing
Number of Pages: 20
Number of Words: 5,084 (approx.)
Number of Characters: 28,984 (approx.)